## Sidee u xasuusan karaa inaan qaato daawoyinkeyga TB?

Mar walba fudeed ma ahan!

Waxaad daawadaada TB qaadan doontaa ilaa lix bilood, sidaas awgeeda waa inaad hab-raac sameysato. Halkaan waxaa ku qoran talooyin:

- Kaniinigaaga qaado isla waqti maalin walba iyo isku meel ku keydi
- Kaniinigaaga dhax geli dhalo ama meel qiyaasta usbuuca la qaato lagu keydiyo
- Maalin walba aad kaniiniga TB qaadato ku qor kalendaariyo
- Qaylo xasuusiye oo ku xasuusinaayo inaad daawada qaadato diyaari
- Saaxiib ama xubin-qoys ka codso inay kuu noqdaan ‘saaxiibka daaweynta’ si ay kuu xasuusiyaan inaad kaniinigaaga qaadato
- U sheeg kaaliyahaada ama takhtarkaaga TB haddii aad qiyaas-daawo hilmaamtey – kuguma xanaaqi doonaan iyo waxay isku dayi doonaan inay ku caawiyaan

Waa inaad xittaa tegtaa dhammaan ballamadaada rugta caafimaad. Takhtarkaaga ama kaaliyahaada caafimaad ayaa u baahan inay arkaan sida aad tahay.

## Daaweynta si Toosan Loo Kormeero

Hubinta inaad qaadato dhammaan daawoyinkaaga TB wuxuu ahaan karaa wax dhib ah. Wuxuu gaar ahaan aad dhib u noqan karaa haddii aad qabtid qaaxo caabbi ku ah daawada caadi ahaan lagu daaweeyo TB, ama haddii aad qabtid cadaadis kale. Warka fiican waxaa weeyey, waa lagu caawin karaa; caawinta waxaa lagu magacaaba Daaweynta Si Toosan Loo Kormeero, af Ingiriis lagu soo gaabiyey DOT.

DOT waa hab ee dadka lagu caawiyo inay qaataan daawada. Intii guriga ku qaadan leheed kaniinigaaga, waxaad tegi doontaa farmashiiyahaada ama isbitaalkaaga deegaanka si aad u qaadato, ama kaaliye caafimaad ayaa gurigaaga kugu keeni doonto. Kaasi waxaa loola jeedaa inaad lahaan doontid qof aad la sheekeysato, iyo qofkaas wuxuu hubin doonaa inaad qaadato dhammaan daawoyinkaaga TB ilaa aad ka fiicnaato.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo khuseeya TB iyo si aad u akhriso sheekooyinka dhabta ah ee dadka kale ku dhacey cudurka, fadlan u booqo *The Truth About TB* (Runta Ku Saabsan Qaaxada) www.thetruthabouttb.org

**Xasuuso:** Kaaliyahaada TB waxay halkaas u joogtaa si ay talo iyo caawinaad kuu siido intii daawada kuu socoto. Fadlan la xiriir Kaaliyahaada TB haddii aad ku xanuunsato daawadaada ama haddii ay jirto wax aadan hubin oo ku saabsan daawoyinka TB.

Kaaliyahaada TB waa:

Takhtarkaaga isbitaalka waa:

Telefoon:

Email:

TB Alert, Community Base, 113 Queens Road,
Brighton, BN1 3XG
Tel: 01273 234029 **www.tbalert.org**

Haddii aad su’aalo ka qabtid TB, ama rabtid inaad ogaato warar ka badan oo ku saabsan TB Action Group (TBAG) fadlan wac 01273 234770.

**TB Alert** waa urur samafal qarameed ee horyaal ku ah qaaxada. Barnaamajyadeena waxaa laga qabtaa UK, Hindiya iyo Afrika, waxaana xittaa si iskaashato ah la shaqeynaa qolooyin caalam ah si aan adduunka oo dhan ka hortagno TB’da. Wax-qabadyadeena waxay diiradda saaraan seddax qayb wayn:

- Kor u qaadida aqoonta u shacbiga ka qabo TB, iyo taageerida bukaanka intii ay daawada u socoto
- Isku keenida sharciyada adeegyada caafimaadka, ururyada mutaddaawiciinta iyo dadka uu TB saamayn ku yeeshey si loo qorsheeyo iyo bixiyo adeeg TB ka fiican
- Siyaasadaha wax soo saarka iyo codsiga iloyin lagu wanaajiyo xannaanada bukaanada, laga hortago iyo la xakameeyo qaaxada

Hawsheena waxaan ku taageerna ujeddada ururkeena oo ah in la kordhiyo helidda daaweyn wax-tar leh ee lagu daaweeyo dhammaan dadka qabo TB.

Macluumaad walba ee ku qoran buug-yarahaan kuna saabsan cudur-aqoonsiga iyo daaweynta qaaxada waxaa loogu talagalay oo kaliya in cudurka laga baxsho macluumaad guud. Looguma talagalin inay beddel u noqoto cudur-oaqoonsiga, xirfadda, khibradda iyo aqoonta takhaatiirta, farmashiistayaalka ama xirfadlayaasha caafimaad ee kale ee bukaanka xannaaneeyo. Dhammaan macluumaadka ku qoran buug-yarahaan looguma talagalin in lagu go’aamiyo cudur-aqoonsi ama daaweyn. Su’aal iyo wel-wel walba laga qabo cudur-aqoonsiga iyo daaweynta waa in loola tego xirfadlayaasha caafimaadka.

TB Alert waa shirkad dammaano ku xadeysan, ku diiwaangashan Ingiriiska Lamb. 3606528. Hay’ad samafal diiwangashan lamb. 1071886. design: **worksong**, london 020 8352 8300 Revised 2013

MACLUUMAADKA BUKAANKA

# Daaweynta Qaaxada (TB)



NHS

**Qaaxada (TB) waa cudur la daaweyn karo iyo daaweynta qof walba bilaash ayuu ka yahay dalka UK. Buug-yarahaan wuxuu kugu caawin doonaa garashada daaweyntaada iyo wuu ku dhiirri-gelin doonaa ilaa aad ka ficnaato.**

## Waa maxay qaaxada?

Qaaxada (TB) waa cudur oo jeermis sababo. TB'da badanaa wuxuu saameeyn ku yeeshaa sambabta, laakiin qaaxada meel walba ee jirkaaga ayuu ku dhici karaa. TB'da waxaa lagu daaweyn karaa antibiyootiko waqti dheer la isticmaalo, badanaa lix bilood. Qaaxada ku dhacdo sambabta ama dhuunta waa nooca kaliya ee faafi kara, waxaa kaani loola jeedaa in loo gudbin karo dad kale. Dadka badanaa cudurka ma faafiyaan labo usbuuc ka dib markii daawada saxda ah loo bilaabo.

## Sidee loo qaada TB?

Markii qof qaaxo ku qabo dhuunta ama sambabta uu qufaco ama hindhiso, jeermiska TB'da ayaa hawada qaadaayo iyo dadka kale ayaa neefsan karo. Badanaa TB wuxuu kugu dhici karaa haddii waqti dheer la joogtey qof qabo TB, tusaale ahaan isla guri ku nooshihiin. Waa dhif inaad TB ka qaado qof ku ag fadhiyo oo TB qabo sida baska ama tareenka gudahiisa, sababtoo ah waxaa loo baahan yahay in saacado badan qofka cudurka qabo la ag joogo ka hor intii halis cudur-qaadasho ku gaarin. TB **laguma** gudbiyo candhuuf la tufey ama kala qaybsiga bikeeri, saxan ama qaado iyo waxyaabaha cuntada lagu cuno.

## Sidee loo daaweeya TB?

TB waxaa lagu daaweeyaa daawo antibiyootiko gaar ah oo loo baahan yahay in la isticmaalo lix bilood. Dhirirka daaweynta wuxuu ku xiran yahay haddii uu jirkaaga caabbi ka noqdey ama u adkeysto badanaa daawoyinka loo isticmaalo daaweynta TB iyo goobta jirkaaga ee qaaxadu ku jiro.

**Dhammeystirka daaweynta oo dhan waa habka kaliya ee si buuxa lagu daaweyn karo TB.**

## Waa maxay daaweynta TB?

Takhtarkaaga TB wuxuu badanaa kugu bilaabi doonaa afar daawo kala duwan. Waxay kala yihiin:

- Rifampicin
- Isoniazid
- Pyrazinamide
- Ethambutol

Waxaa suurto gal ah in dhammaan daawoyinkaan lagugu siiyo hal kaniini lagu magacaabo Voractiv. Isoniazid, Rifampicin iyo Pyrazinamide waxaa lagugu siin karaa hal kanini lagu magacaabo Rifater.

Labo bilood ka dib, daaweynta waxaa badanaa laga dhigaa labo daawo, oo kala ah Isoniazid iyo Rifampicin. Daawoyinkaan waxaa lagugu siin karaa hal kanini lagu magacaabo Rifinah.

## Daawoyinka TB miyeey ammaan yihiin?

Daawoyinka TB waxay mar mar sababi karaan waxyeello, sida daawoyinka kale. Macluumaad ku saabsan daawoyinka kala duwan iyo waxyeelladooda waxaa laga heli karaa shaqaalaha kilinikada TB. Tusaale ahaan, waxay ku siin karaan buug-yare kale ee TB Alert oo lagu magacaabo 'Ku Saabsan Daawoyinka Qaaxadaada (About Your Tuberculosis (TB) Drugs)'.

Ogeysii takhtarkaaga inaad qaadato daaweynta TB markii ay ku qoraayaan daawoyin kale, sababtoo ah way is-khilaafi karaan. Gaar ahaan, daawoyinka TB *waxay yareeyaan saamaynta daawada hormoonka ee uurka looga hortago* (kaniini, ama wax kale ee daawada ku jirta) sidaa awgeed haweenada waa inay isticmaalaan habab kale ee loogu hortago uur-qaadka markii ay qaadanaayaan daawada TB. Weydii takhtarkaaga ama kaaliyahaada wixii talo ah.

**Muhiim:** Isticmaalka daawoyinka TB waxay cadaadis dheeraad ah gelinayaan beerka. Sidaas awgeeda waa inaadan khamri cabin intii ay daawada TB kuu socoto. Haddii aad u baahan tahay inaad khamri cabto, waa muhiim in wax yar laga cabo.

Rifampicin, Isoniazid, Pyrazinamide iyo Ethambutol si caadi ah ayaa loo qaadan karaa markii uur la leeyahay.

## Imisa jeer ayaan qaataa daawadeyda?

Daawoyinka TB waa in la qaataa si joogto ah, sida uu takhtarkaaga kuu tilmaamo/qoro. Haddii aad hilmaamto inaad qaadato qiyaas –daawo, isla markiiba aad xasuusato qaado. Laakiin haddii waqtiga aad xasuusato uu dhow yahay waqtiga aad qiyaas-daawo kale qaadan leheed, markaa qiyaasta aad hilmaamtey iska dhaaf ee qiyaasta caadiga ah qaado. **Labo qiyaas-daawo ha isla qaadanin.** Mar walba takhtarkaaga ama kaaliyahaada caafimaad u sheeg haddii aad hilmaamtey inaad kaniinigaaga qaadato.

## Maxaa dhici doono haddii aan dhammeyn waayo daawadeyda ?

Waad fiicnaan doontaa markii aad waqti qaadato daawada TB. Hase-yeeshe, haddii aad qaadan weyso dhammaan daawoyinkaaga waqtiga laguu qorey, qaaxada jirkaaga kama bixi doono.

Haddii aad dhammeyn weyso daaweyntaada:

- Waxaad noqon doonta qof aad u jirran
- Waxaad TB u gudbin kartaa dad kale
- Jeermiska qaaxada ayaa caabbi ka noqon karo ama u adkeysan karo daawada TB
- Daaweyntaada TB ayaa la dheereyn karaa

> ***"Ma jecli inaan kaniini qaato, yaa kaniini jecelba? Laakiin waan ogaa inaan u baahanay inaan qaato, sababtoo ah ma rabin inaan TB u gudbiyo carruurteyda ama jeermiska qaaxadeyda caabbi ka noqdaan daawada TB, kaasoo aad dhib u ah in la daaweeyo. Aad ayaan ugu farxey markii aan dhammeyey daaweynta, sababtoo ah waan ogaa in qaaxada ka bogsoodey. "***
> *Natalie, taliyaha bukaanka TB, TB Action Group*

## Halkee ka heli karaa taageerid?

Haddii aad qabtid TB, waxaa jiro caawinaad aad heli kartid sidii aadan u dareemin keli ahaan.

Kaaliyahaada TB ayaa halkaas joogto si ay kugu taageerto daaweynta qaaxada. Hubi inaad tegto dhammaan ballamada iyo u sheeg xirfadlayaasha caafimaad haddii aad dhibaato ku qabtid qaadashada kaniiniyaashaada.

Waxaa faa'iido lahaan karo inaad la hadasho qof kale oo TB qabo oo iminka roonaadey. Dignin-bixinta TB (TB Alert), waa urur samafal qarameed ee horyaal ku ah qaaxada dalka UK, waxayna kula xiriirin karaan xubin ka mid ah **Kooxda Wax-qabadka Qaaxada (TB Action Group (TBAG))** oo ku farxi doono inuu kula sheekeysto iyo kugu caawiyo daaweyntaada.